

Somali

Maktabad - deeq u furan cid walba

Hagaha maktabada

Maktabaddu waa deeq u furan cid walba.

Maktabaddu waa meel bilaash ah oo u furan kulminta carruurta, dhalinyarada iyo dadka waaweynba.

Xeerar isku mid ah ayaa dadkoo dhan ka yaal.

Maktabadda qalab noocyo badan ah ayaa laga helaa: Buugaag, wargeysyo, wargeys-xilliyeedyo, buugaag codaysan, meelaha qaarkoodna waxaa laga helaa koorsooyin luuqadeed, muusik, «internett» iyo fiidyow/DVD.

Qalabka intooda badan waa la amaahan karaa oo guryaha ayaa loo qaadan karaa.

Buugaagta la daalacdo, wargeysyada iyo wargeys-xilliyeedyada caadi ahaan lama amaahan karo oo guryaha looma qaadan karo.

Maktabadaha norwiiijiga waxaad ka heli buugaag iyo wargeysyo xambaarsan siyaasado iyo diimo kala duwan. Kala duwanaanta iyo badnida deeqdu waa mabda' muhiim ah.

Maktabadaha waxaa leh oo kharashkooda baxsha degmooyinka.

Sidee baad wax u amaahan kartaa?

Dhammaanba dadka Norway ku nool waxay heli karaan kaar-amaahsi iyagoo tusaya aqoonsi. Carruurta waa inay keenaan saxiix waalid ama midka cidda mas'uulka ka ah si loo siiyo kaar-amaahsi.

Kaarka amaahdu waa wax qofka u gaar ah oo aysan dadka kale isticmaali karin.

Amaahsada ayaa mas'uul ka ah waxyaalaha kaarka lagu amaahdo.

Kaarka amaahda waa in la tusaa mar kasta oo wax la amaahanayo.

Muddada amaahdu caadi ahaan waa 4 toddobaad, laakiin buugaagta qaarkood waxay maktabaduhu u qaban karaan wakhtiyada kale. Wakhtiyada buugaagta lagu soo celinayo weydii maktabaddaada. Buugaag ka amaahashada maktabaddu waa bilaash, laakiin haddii aad buugaagta la soo daahdo,

ganaax ayay maktabaddu ku saari doontaa.

Waajib ayay kugu tahay inaad magtid ama guddid qalabkii luma ama hallaaba.

Deeq loogu talagalay carruurta, dhalinyarada iyo dadka waaweyn

Maktabadda waxaad ka heli kartaa warqado daabacan oo sidii buugaagtii u samaysan (brosjyrer), diiwaanno ay koorsooyin ku qoran yihiin iyo macluumaad kale.

Wargeysyo iyo wargeys-xilliyeedyo ayaad akhrinsan kartaa.

Su'aalaha aad qabto badidood waxaad jawaabtooda ku heli kartaa adigoo shaqaalaha weydiiya ama adigoo isticmaala buugaagta la daalacdo iyo buugaagta kaleba.

Waxaad amaahan kartaa buugaag sheekooyin, qaar sheekooyin khiyaali ah (eventyr), buugaagta farshaxanka, gabay, ruwaayado iyo buugaag ka hadlaysa mawduucyo kala duwan.

Sidoo kale waad amaahan kartaa buugaag ka sheekaynaya mawduucyada badankooda.

Maktabado badan baa leh qabanqaabooyin loogu talagalay carruurta, dhalinyarada iyo dadka waaweyn. Qorshaha waxyaalaha weydii aktabaddaada.

Buugaag ku qoran af somali

Maktabadda waxaa yaalla buugaag ku qoran luuqado badan.

Degmooyinka ay joogaan somali badan waxaa aalaaba maktabadahooda yaalla buugaag ku qoran luuqadaha ay dadkaasi ku hadlaan.

Shaqaalaha weydii haddii aadan maktabadda ka helin buugaag luuqaddaada ku qoran.

Maktabaddu waxay buugaag ku qoran af somali ka soo heli kartaa Maktabadda Luuqadaha Badan ee Oslo iyo maktabadaha kaleba.

Maktabadda Luuqadaha Badan (DFB)

Maktabadda Luuqadaha Badani waa maktabad khaas u ah suugaanta luuqadaha kala duwan ee dadka laga tiro badan yahay.

Maktabaddu dadweynaha uma furna.

Buugaagta Maktabadda Luuqadaha Badan waxaad ka dalbanaysaa maktabadda degmadaada. Maktabaddaada ayaa gudbineysa codsigaaga buugaagta iwm.

Liiska buugaagta

Maktabadda Luuqadaha Badan waxay soo saartaa liisas ay ku qoran yihiin buugaag ku qoran luuqado badan. Liisaska wararku waxay ku jiraan bogga «internett» ka ee «DFB» oo ah: - www.dfb.deichman.no. Liisaska weydii maktabaddaada!

Maxaad maktabadda u isticmaali kartaa?

Inaad luuqaddaada hooyo xafiddid!

Akhrinta buugaag ku qoran luuqadda hooyo, waxay ku geyeysiinaysaa inaad xafiddid luuqadda hooyo. Carruurta oo aad u akhrisid buugaag-carruureed waxay suurtagalinaysaa inaad luuqadda u gudbisid carruurta. Waa muhiim in la xafido luuqadda hooyo.

In af-noorwiiji la barto!

Si loola qabsado bulshada norwiijiga waxaa lagama maarmaan ah in luuqadda la yaqaanno. Amaahsiga koorso luuqadeed, akhrinta buugaagta iyo dhegaysiga buugaag-codaysan ayaad af-noorwiijiga ku baranaysaa.

Macluumaad la soo bixid ama raadsasho!

Waa muhiim in aqoon fiican la yeesho. Maktabadda waxaad ka heli kartaa macluumaad la xiriira:

- bulshada norwiijiga
- dalkaagii
- xuquuqdaada
- waajibaadkaaga
- mawduucyada badankooda

Maktabaddaadu waa:

FREDRIKSTAD BIBLIOTEK

J.N. Jacobsensgt. 1

1601 Fredrikstad

Tlf. 69 38 34 00

www.fredrikstad.kommune.no/biblioteket

Isticmaal maktabadda!

Utgitt av Deichmanske bibliotek. Det flerspråklige bibliotek. Oslo 2003